**JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA & DIB-U-HESHIISIINTA**

# HINDISE-SHARCIYEEDKA DAWLADAHA HOOSE (116)

# Tusmada Sharciga

Hordhac ........................................................................................................2
Qodobka 1aad: Eray Bixin....................................................................................4
Qodobka 2aad: Mabaadi'da Guud..........................................................................4
Qodobka 3aad: Baahinta Maamulka Degmooyinka ..................................................5
Qodobka 4aad: Madax-bannaanida Dawladaha Hoose ............................................5
Qodobka 5aad: Darajeynta Degmooyinka...............................................................5
Qodobka 6aad: Shuruudaha Lagu Dhisi Karo Degmo Cusub....................................5
Qodobka 7aad: Shuruudaha Lagu Dhisi Karo Gobol Cusub.......................................6
Qodobka 8aad: Gobollada iyo Degmooyinka ...........................................................6
Qodobka 9aad: Sameynta Goleyaasha Deegaanka ...................................................6
Qodobka 10aad: Shirweynaha Doorashada Golaha Deegaanka ..................................6
Qodobka 11aad: Doorashada Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada, Ku-xigeennadiisa iyo Muddada xilka ay haynayaan.................................................7
Qodobka 12aad: Dhaarta ........................................................................................8
Qodobka 13aad: Muddo Xileedka Golaha Deegaanka................................................8
Qodobka 14aad: Fadhiyada Goleyaasha Deegaanka .................................................8
Qodobka 15aad: Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada iyo Ku-xigeennadiisa..8
Qodobka 16aad: Shuruudaha Xubinnimada Goleyaasha Deegaanka ...........................8
Qodobka 17aad: Xasaanadda Xubnaha Goleyaasha Deegaanka..................................9
Qodobka 18aad: Waajibaadka Golaha Deegaanka .....................................................9
Qodobka 19aad: Awoodaha Golaha Deegaanka .........................................................9
Qodobka 20aad: Xoghayaha Dawladda Hoose ...........................................................10
Qodobka 21aad: Shaqaalaha Dawladaha Hoose .........................................................11
Qodobka 22aad: Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku-xigeennadiisa .................................11
Qodobka 23aad: Waajibaadka Guddoomiyaha Gobolka ............................................11
Qodobka 24aad: Waajibaadka Ku-xigeennada Gudoomiyaha Gobolka .......................11
Qodobka 25aad: Guddiga Nabadgelyada Gobolka ....................................................11
Qodobka 26aad: Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka .................................12
Qodobka 27aad: Kormeerka iyo Baarista Miisaaniyadda Dawladaha Hoose ..................12
Qodobka 28aad: Hantida Dawladaha Hoose ..............................................................12
Qodobka 29aad: Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose ..................................................12
Qodobka 30aad: Dakhliga Dawladaha Hoose .............................................................12
Qodobka 31aad: Habka Canshuur Saaridda.................................................................13
Qodobka 32aad: Ururinta Dakhliga.............................................................................13
Qodobka 33aad: Kharashka.........................................................................................13
Qodobka 34aad: Habka Xisaabaadka ..........................................................................14
Qodobka 35aad: Mas'uuliyad Xisaabeed .....................................................................14
Qodobka 36aad: Gunnooyinka iyo Mushaharaadka Madaxda iyo Shaqaalaha Dawladaha Hoose ..........................................................................................................14
Qodobka 37aad: Bannaanaanshaha Xilka Xubinnimada Golayaasha Deegaanka...........14
Qodobka 38aad: Xallinta Khilaafaadka Maamullada Degmooyinka...............................14
Qodobka 39aad: Fara-gelinta Dawladda Federaalka ee Xallinta Khilaafaadka Maamullada Degmooyinka iyo Dawlad Goboleedyada ..........................................................15
Qodobka 40aad: Baabi'in .............................................................................................15
Qodobka 41aad: Dhaqangal...........................................................................................15
Qodobka 42aad: Dib-u-eegis .........................................................................................15

## HINDISE-SHARCIYEEDKA DAWLADAHA HOOSE EE (116)

### HORDHAC

Hannaanka Dawladaha Hoose waa qeyb kamid ah qaab-dhismeedka Dawladda Soomaaliya. Dhammaan Dastuurradii dalka soo maray oo ay kamid yihiin kuwii 1960, 1979 iyo 2012, waxaa lagu aqoonsaday jiritaankooda, qaab-dhismeedkooda iyo waajibaadkoodaba, gaar ahaan Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee 2012-ka waxaa lagu aqoonsaday in Goleyaasha Deegaanka iyo Maamullada Dawladaha Hoose ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS)ay yihiin hay'ado Qaran lehna shakhsiyad-qaanuuneed una madax-bannaan gudashada waajibaadka loo idmaday. Ujeeddada Sharcigan Dawladaha Hoose ee 116 waa sidii dib loogu asaasi lahaa Goleyaasha iyo Maamullada Dawladaha Hoose oo rasmi ah loo doortay kuwaasoo ay garwadeen ka yihiin ayna maamulayaan muwaadiniinta heer deegaan ah. Sharcigan oo markii hore loogu yeeri jiray "**Sharciga Maamullada Degmooyinka iyo Gobollada Dalka**" waxaa horey u ansixiyay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya 6dii Agoosto, 2013, wuxuuna ku soo baxay Faafinta Rasmiga ee tirsigeedu yahay Lr.6, 1aad ee Nofeembar, 2013.

In Sharciga 116 dib-u-eegis lagu sameeyowaxaa keenay kaddib markii ay soo ifbaxday baahida ah in la is-waafajiyo wacyiga federaalka iyo shariga 116, wadatashi dheer kaddib, ayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dawlad Goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir isku raaceen nuqulka cusub. Sharci Lr. 116/2013 oo markii hore loogu tala galay in lagu dhiso Degmooyinka, Gobolada iyo Dawlad Goboleedyada dalka, ayaa nuqulka dib-u-eegistu ku soo koobayaa in lagu soo dhiso degmooyinka dalka oo keliya magaciisuna wuxuu isu bedelay "**Sharci Lr. 116 ee Dawladaha Hoose".** Sharcigan hadda wuxuu ku dhisan yahay baahinta maamulka sida ay dhigayaan Qodobadda 48aad, 49aad iyo 50aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012).

Sameynta Goleyaasha Deegaanka waxaa u xilsaaran Dawlad Goboleedyadda si waafaqsan qodobka 48aad faqradiisa (1) xarafkiisa (B) ee Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay u xil saaran tahay haggidda, taageeridda, kor-joogteynta iyo hubinta in dhismaha goleyaasha deegaanku ay u dhacday si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka nidaaminaya ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed iyo sharciyeyntooda.

Si waafaqsan Dastuurka KMG, Gobollada iyo Degmooyinka Dalka waa kuwii uu lahaa gobol kasta taariikhdu markii ay ahayd 31.12.1990, Goleyaasha Deegaankaee dhammaan degmooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa lagu soo dooranayaa doorasho dadweyne oo qof iyo cod ah si waafaqsan xeerarka doorashada ee dalka. Inta laga gaarayo xaalad ogolaanaysa hirgelinta hannaanka doorashada qof iyo cod, Goleyaasha Deegaanka waxaa lagu soo dhisayaa habraaca ku cad **Qodobka 10aad ee sharcigan.**

## Qodobka 1$^{aad}$
## Eray-bixin

Marka sharcigan la raacayo, erayada soo socda waxay leeyihiin macnaha mid walba ku hor qoran:

1. **Xeer:** Waxaa loola jeedaa hab-nidaamiye heer Dawlad-goboleed ama heer Dawladaha Hoose ah laguna maamulayo laamaha hay'adaha dawladda ee heer Gobol ama heer Degmo.
2. **Guddoomiye:** waxaa loola jeedaa madaxa ugu sarreeya Gobolka ama Dawladda Hoose ahna Duqa Magaalada.
3. **Xoghayaha Dawladda Hoose:** waxaa loola jeedaa sarkaalka ugu sarreeya shaqaalaha Dawladda Hoose.
4. **Degmo:** waxaa loola jeedaa deegaan leh soohdimo cayiman kana kooban ugu yaraan Shan tuulo oo ay kunoolyihiin ugu yaraan 10,000 (Toban Kun) oo qof tuuladiiba, oo leh adeegyada bulshada, soona saaran karta 70% (boqolkiiba todobaatan) miisaaniyadda guud ee degmada.
5. **Gobol:** waxaa loola jeedaa qeyb ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo leh ugu yaraan afar degmo ayna ku nool yihiin ugu yaraan 200,000 (laba boqol oo Kun) oo qof soona saaran kara 70% miisaaniyaddiisa.
6. **Dawlad-goboleed:** waxa loola jeedaa maamul qeyb ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ka kooban ugu yaraan labo gobol sida ku cad Qodobka 49$^{aad}$ Faqradiisa 6$^{aad}$ ee Dastuurka Federaalka Ku Meel Gaarka ah.
7. **Darajada A:** waxaa loola jeedaa dhammaan caasimadaha gobollada iyo magaalo madaxda Dawlad Goboleedka.
8. **Darajada B**: waxaa loola jeedaa dhammaan degmooyinka aan ahayn Darajada (A).
9. **Golaha Deegaanka**: waxaa loola jeedaa hay'adda Xeer-dejinta ee heer Degmo.
10. **Wasaarad**: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dib-u-heshiisinta.
11. **JFS**: Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 2$^{aad}$
## Mabaadi'da Guud

1. Mabaadi'da Islaamka iyo Dastuurka Federaalka KMG ah ayaa saldhig u ah sharcigaDawladaha Hoose ee JFS sida uu qabo Dastuurka Dalka qodobadiisa 2$^{aad}$ iyo 3$^{aad}$.

2. Maamullada dawladaha hoose ee JFS waa hay'ad qaran lehna shakhsiyad-qaanuuneed una madax-bannaan gudashada waajibaadka loo idmaday.

## Qodobka 3aad
## Baahinta Maamulka Degmooyinka

1. Nidaamka Dawladaha Hoose wuxuu ku dhisanyahay baahinta maamulka sida ku cad Qodobada 48aad, 49aad iyo 50aad ee Dastuurka JFS,Dawladaha Hoose waa qeyb kamid ah qaab-dhismeedka Dawladda Soomaaliya, waxayna fulinayaan hawlaha Sharcigan u xilsaarayo.

2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ayaa u xilsaaran arrimaha siyaasadda, xiriirinta, kor-joogtaynta iyo kormeerka Dawladaha Hoose.

## Qodobka 4aad
## Madax-bannaanida Dawladaha Hoose

1. Dawladaha Hoose waa hay'ado ismaamula lehna shakhsiyad-qaanuuneed oo ay ku gudanayaan xilalka uu Sharciganu xilsaarayo.

2. Dawladaha Hoose waxay yeelan karaan astaan iyo shaabbad u gaar ah oo Golaha Deegaanka uu u ansixiyo.

3. Dawladaha Hoose waxay u madax-bannaan yihiin gudashada xilalka uu Sharcigani u xil saarayo.

## Qodobka 5aad
## Darajeynta Degmooyinka

Degmooyinka waxa ay kala leeyihiin darajooyinka soo socda:

1. Degmooyinka ah caasimadaha Gobollada iyo kuwa Dawlad-goboleedyada waxay qaadanayaan Darajada (A).

2. Degmooyinka ka soo hara kuwa ku xusan Faqrada 1aad ee Qodobkan waxay qaadanayaan Darajada (B).

3. Degmooyinka Darajada (A) waxay yeelanayaan 27 xubnood oo gole deegaan ah.

4. Degmooyinka Darajada (B) waxay yeelanayaan 21 xubnood oo gole deegaan ah.

## Qodobka 6aad
## Shuruudaha Lagu Dhisi Karo Degmo Cusub

Degmo cusub waxaa lagu dhisi karaa oo keliya Shuruudaha soo socda:

1. Degmo waa deegaan leh soohdimo cayiman oo ka kooban ugu yaraan 5 tuulo, oo ay ku noolyihiin ugu yaraan marka la isku geeyo konton Kun (50,000) oo qof,
2. Tuulada waa in ay ku noolyihiin ugu yaraan toban Kun (10,000) oo qof, lehna dugsi hoose, dugsi Quraan, rug boolis, xafiis dawlad hoose iyo rug caafimaad, soona saaran karto 25% Dakhliga guud ee Degmada.

3. Degmadu waa in ay soo saaran karto toddobaatan boqolkiiba (70%) ku tala-galka Miisaaniyadda Degmada.

4. Masaafada u dhaxeysa laba degmo waa in aysan ka yaraan 40 (afartan) km, marka laga reebo Gobolka Banaadir oo aan laga dhaqayn sharcigan.

5. Dawlad-goboleedku waa in uu soo-jeediyo magacaabidda degmo cusub ka hor inta aan Baarlamaanka dawladda federaalku ansixin degmada cusub.

## Qodobka 7aad
## Gobollada iyo Degmooyinka

Marka laga reebo Gobol ama Degmo lagu dhisay si waafaqsan Qodobbada 6aad iyo 7aad ee Sharcigan:

1. Degmooyinka Dalka waa kuwii uu lahaa gobol kasta taariikhdu markey aheyd 31. 12. 1990 kii.

2. Gobollada Dalka Soomaaliya waxay ka kooban yihiin 18 gobol.

3. Magaala Madaxyada Gobolladu waa kuwii jirey taariikhdu markey ahayd 31. 12. 1990kii.

4. Caasimada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa Magaalada Muqdisho sida ku cad qodobka 9aad ee Dastuurka KMG ah, waxayna yeelanaysaa sharci u gaar ah

## Qodobka 8aad
## Goleyaasha Deegaanka

1. Sameynta iyo ka shaqaynta Doorashada Golayaasha Deegaanka waxaa u xilsaaran Dawlad-goboleedyada si waafaqsan qodobka 48aad Faqradiisa 1aad xarafkiisa (B) ee Dastuurka KMG ah.
2. Dawlad-goboleedyada oo kaashanaya odayaasha dhaqanka ee deegaanka waxay xalinayaan wixii khilaaf ah ee beelaha ka dhex jira si loo gaaro dib-u-heshiisiin rasmi ah.

3. Wasaarada Arimaha Gudaha, Federalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay u xilsaran tahay kor-jogtaynta iyo hubinta in dhismaha Goleyaasha Deegaanka ay u dhacday si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka nidaaminaya ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed.

4. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-uheshiisiintu waxay sameynaysaa habraacyada lagu dhisayo Goleyaasha Deegaanka ka hor inta aan la gaarin doorasho dadweyne oo qof iyo cod ah.

5. Qof kasta oo muwaadin Soomaali ahi waxa uu xaq u leeyahay in la doorto isaguna wax doorto.

## Qodobka 9aad
## Shirweynaha Doorashada Golaha Deegaanka

1. Goleyaasha Deegaanka ee dhammaan degmooyinka JFS waxaa lagu soo dooranayaa doorasho dadweyne oo qof iyo cod ah si waafaqsan Xeerka doorashooyinka ee Qaranka.

2. Inta laga gaarayo xaalad ogolaanaysa hirgelinta hannaanka doorashada qof iyo cod, Goleyaasha Deegaanka waxaa lagu soo dhisayaa habraaca soo socda:
   b. Dawlad Goboleedka ayaa abaabulaya Shirweyne heer degmo ah kaasi oo la isugu keenayo oday dhaqameedyada beelaha wada dega degmada;

3. Abaabulka Qabashada Shirweynaha iyo fidinta gogasha lagu dhisayo Maamullada goleyaasha deegaanka Degmooyinka waxaa mas'uuliyadeeda leh:
   b. Odayaasha Dhaqanka ee Deegaanka oo kaashanaya Xildhibaanada Qaranka iyo kuwa Dawlad-Goboleedyada ee ka soo jeeda deegaankaas iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, odayaasha dhaqanku waxay soo xulayaan xubnaha ergooyinka;
   t. Odayaasha Dhaqanka ee Deegaanka waxay xallinayaan khilaaafaadka Beelaha ka dhex jira si loo gaaro dib-u-heshiisiin rasmi ah.

4. Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dawlad-goboleedyada waxay u xilsaaran yihiin

   B. Sugidda Amniga;
   T. Qiimeynta, diyaarinta iyo bixinta kharashka shirweynaha;
   J. Hubinta habsami u socodka shirweynaha; iyo
   X. Turxaan bixinta khilaafaadka.
5. Marka shirweynuhu yahay heer degmo ergooyinkiisu waxay ka imaanayaan dhammaan beelaha tuulooyinka degmadaas deggan.
6. Tirada ergooyinka shinweynaha Degmada Darajada (A) waa in ay:
   B. Noqdaan 150 xubnood;
   T. 25% (Shan iyo labaatan boqolkiiba) noqdaan haween.
7. Tirada ergooyinka shirweynaha Degmooyinka Darajada (B) waxay noqonayaan 100 (Boqol) xubnood, iyadoo qoondada haweenku ay tahay 15% (Shan iyo toban boqolkiiba).
8. Xulidda tirada xubnaha Golaha Deegaanka ee degmda waxay ku saleysan tahay darajada Degmada sida:
   B. Degmada (A) oo ah 27 xubnood; iyo
   T. Degmada (B) oo ah 21 xubnood.

9. Shirweynaha waxaa uu iska dhex dooranayaa guddoomiye iyo laba ku-xigeen, xoghayn iyo afhayeen oo hoggaaminaya habsami-u-socodka shirka.
10. Xil qabashadu waa awood qeybsi Deegaan iyadoo aan laga tageynin aqoonta iyo waayo-aragnimada xil-qabtaha.
11. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiintu waxay xaqiijineysaa in doorashadu u dhacday si waafaqsan sharciyada dalka iyo in dhammaan qeybaha bulshadu ka qeyb-qaateen doorashada degmada.
12. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisntu waxay ogolaanaysaa habraaca doorashada degmada kaddib marka ay hubiso xalaalnimadiisa.
13. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiintu waxay kormeeraysaa, goob-joogna ka ahaaneysaa xulitaanka ergooyinka iyo habraaca doorashooyinka, waxayna xaqiijineysaa arrimaha farsamada ee shirweynaha.
14. Marka la gaaro doorasho qof iyo codkiisa waxaa Golayaasha Deggaanku loogu tartamidoonaa qaab Xisbi.

## Qodobka 10aad
## Doorashada Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada, Ku-xigeennadiisa iyo Muddada ay Xilka Haynayaan

1. Codeynta doorashada Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada iyo ku xigeenadiisa waxay noqonayaa qarsoodi, waxaana iska dhex dooranaya Golaha Deggaanka
2. Wareegga 1aad waxaa lagu kala baxayaa 2/3 (saddex meelood labo meel) tirada guud ee xubnaha golaha ee codka bixinaya.
3. Haddii wareega 1aad qof heli waayo 2/3 (saddex meelood labo meel) tirada guud ee xubnaha golaha ee codka bixinaya, 3 (saddexda) musharax ee ugu cod sarreysa ayaa mar labaad loo codeynayaa oo u gudbaya wareegga 2aad.
4. Haddii wareega 2aad lagu kala bixi waayo, 2 (Labada) musharrax ee ugu cod sarreysa ee isku soo harta waxay ku kala baxayaan cod hal dheeri ah (50%+ 1) tirada guud ee codka bixisay.
5. Muddada ay xilka haynayaan waa 4 (afar) sano.

## Qodobka 11aad
## Dhaarta

Xubin kasta oo loo soo doorto Golaha Deegaanka wuxuu marayaa dhaarta soo socota: “*Waxaan ku dhaaranaya Magaca Ilaahay in aan xilka la ii doortay u guto si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo Diinta ku jirto dhowrana Dastuurka Qaranka iyo Shuruucda kale ee dalka*”.

## Qodobka 12aad
## Muddo Xileedka Goleyaasha Deegaanka

Muddada ay xilka haynayaan Golaha Degaanku waa 4 (afar) sano oo ka bilaabanaysa maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo.

**Qodobka 13aad**
**Kullamada Goleyaasha Deegaanka**

1- Goleyaashu waxay samaysanayaan Xeer-hoosaadyo nidaamiya Kullamadooda. Kulanka ugu horreeyana waxay yeelanayaan 30 (soddon) maalmood gudahood laga billaabo marka lagu dhawaaqo natiijada.
2- Waxay kaloo dajisanayaan barnaamij horumarineed ee deggaankooda oo la jaanqaadikarta qorshaha Horumarineed ee Dowlad Goboleedka.

**Qodobka 14aad**
**Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada iyo ku-xigeenadiisa**

1. Degmadu waxa ay yeelanaysaa Guuddoomiye ahna Duqa magaalada iyo 1 (hal) ama 2 (laba) ku-xigeenno oo ay iska dhex doortaan Golaha Deegaanku.
2. Lahaanshaha 1 (hal) ama 2 (laba) ku-xigeenno ee loo jaan-goynayo Deegaanada, waxaa lagu caddeynayaa sharciyada dawladaha hoose ee heer Dawlad-goboleed.

**Qodobka 15aad**
**Shuruudaha Xubinnimada Goleyaasha Deegaanka**

Qofka loo dooranayo in uu ka mid noqdo xubnaha Goleyaasha deegaanka;
1. Waa in uu yahay/tahay muwaadin Soomaali ah.
2. Waa in uu yahay/tahay muwaadin aan gelin fal-denbiyeed ay maxkamadi ciqaab ku xukuntay toddobadii sano ee ugu dambaysay.
3. Waa in aan da'diisu/da'deedu ka yareyn 25 (labaatan iyo Shan) sano.
4. Waa in uu leeyahay/leedahay akhlaaq wanaagsan, dhimirkooduna dhanyahay.
5. Waa in uu leeyahay/leedahay aqoon ugu yaraan dugsi sare ama aqoon iyo waayo aragnimo u dhiganta.

**Qodobka 16aad**
**Xasaanadda Xubnaha Golaha Deegaanka**

1. Haddii aan laga haysan ogolaansho Golaha Deegaanka, xubin katirsan golaha deegaanka lama xiri karo, lamana baari karo qof ahaan ama hoygiisa haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira fal-dembiyeed.
2. Xasaanaddu waxay ku egtahay inta ay xubintu xilka hayso.

**Qodobka 17aad**
**Waajibaaka Golaha Deegaanka**

Golaha Deegaanka si waafaqsan Sharcigan waxay yeelanayaan waajibaadka soo socda:
1. Matalaada iyo u adeegidda danaha dadweynaha deegaanka.

2. Noqdo mid ay la xisaabtamaan dadweynaha degmada iyagoo si joogta ah ugu warbixinaya wax-qabadkooda shaqo ee deegaanka ay matalaan.
3. Dhiirri-gelinta iyo xaqiijinta ka qeyb-galka dadweynaha hawlaha Golaha Deegaanka iyo abuuridda dareen lahaansho oo ku aadan Maamulka Dawladaha Hoose.
4. Dejinta siyaasado lagu xaqiijinayo gudashada hawlaha iyo ujeedooyinka loo dhisay dawladaha hoose.
5. Bixinta adeegyada dadweynaha ee sharcigu u oggol yahay sida ugu habboon.
6. Qoondaynta dhaqaale ku filan fulinta hawlaha dawladaha hoose.
7. U hoggaansamidda shuruucda ~~siyaasadaha~~ heer Qaran iyo heer Dawlad-goboleed.
8. In ay wada-shaqayn buuxda la yeeshaan heerarka kale ee Dawladda si loo hubiyo dhowridda Sharciga iyo xasilloonida guud, loona gaaro maamul hagaagsan oo u daneynaya dadweynaha.

## Qodobka 18aad
## Awoodaha Golaha Deegaanka

Golaha Deegaanka waa awoodda ugu sarreysa ee Maamulka Degmada wuxuuna u xilsaaran yahay:

1. lsku-duwidda iyo habsami u socodka hawlaha maamulka degmada.
2. Sugidda amniga iyo xasiloonida Degmada.
3. Xiriirka maamulka Degmada iyo Dawlad-goboleedka.
4. Diyaarinta, isku-duwidda iyo kormeerka mashaariicda horumarineed ee Degmada.
5. U gudbinta Dawlad-goboleedka ku-tala-galka miisaaniyad sannadeedka, miisaaniyad ku celinta, dakhliga iyo xisaaab-xir-sannadeedka ee degmada.
6. Isku-duwidda xiriirka laamaha Dawlada ee Degmada iyo hay'adaha kale.
7. U gudbinta Golaha Deegaanka awaamiirta iyo mashruucyada sharciga ee Dawlad-goboleedka.
8. Daryeelka caafimaadka guud, ka hortagga cudurrada faafa, kor-u-qaadidda nadaafadda faya-dhowrka deegaanka iyo tuulooyinka la xariira degmada.
9. Ururinta Canshuuraha iyo dakhliga Degmada si waafaqsan sharciga canshuuraha ee Dawlada Hoose.
10. Asaasidda suuqyo badeeco iyo kuwa xoolaba.
11. Kormeerka dhismooyinka cusub, kuwa la cusbooneysiinayo iyo kuwa ku haboon in la dumiyo si waafaqsan sharciga.
12. Wax ka qabashada dhibaatooyinka abaaraha, fatahaaadaha, duufaannada, xaalufinta deeganka, dabka halista ah iyo dhibaaato kasta oo wax u dhimi karta bulshada deegaanka ku nool.
13. Daad-gureynta dadweynaha haddii ay dhibaato ku timaaddo iyadoo lala kaashanayo maamulka Gobolka, Dawlad Gobolleedyada, iyo hay’adaha Dawladda Federaalka ah.
14. Qorsheynta iyo fulinta mashaariicda lagu horumarinaayo dhaqaalaha Degmada.
15. Kordhinta wax soo saarka iyo abuuridda ilo dhaqaaale.
16. Dhisidda dugsiyada aasaasiga ah, kuwa Quraanka, xarumaha hooyada iyo dhalaanka (MCH) iyo xannaanada agoonta, naafada iyo goobaha cibaadada.

17. Horumarinta Fanka, lsboortiga, Hidaha iyo Dhaqanka.
18. Diyaarinta mashaariicda la xiriira biyaha, korontada iyo adeegyada kale ee lagama maarmaanka ah.
19. Dayactirka waddooyinka Degmada.
20. Kor-u-qaadidda bilicda deegaanka.
21. Sameynta warqadaha aqoonsiga, diiwaan-gelinta dadweynaha degmada iyo dhawristadiiwaanka dhalashada, dhimashada, guurka iyo furitaanka.
22. Diiwaan-gelinta hantida ma-guurtada ah ee Degmada, Tuulooyinkeeda iyo dhawrista goobaha taariikhiga ah.
23. Abuuridda gaadiidka dadweynaha iyo adeegyada is-u-socodka ee loogu danaynayo dadweynaha Degmada iyo Tuulooyinkeeda.
24. Naqshadaynta magaalada, ruqsadaha dhul bixinta iyo dhismooyinka.
25. Dhismo goobo ganacsi oo loogu talo galay dadweynaha si loogu abuuro Degmada ilo dhaqaale oo cusub.
26. Dib-u-soo-celinta hantida ma-guurtada Qaranka ee degmada.
27. Lsu-celinta hantida la kala haysto (Guurto iyo Ma-guurto).
28. Maamul u samaynta tuulooyinka Degmada.
29. Bixinta shatiyada Ganacsiga ee Degmada.
30. Magacaabista madaxda laamaha Degmada iyo ka ansixintooda Golaha Deegaanka.
31. Ansixinta shaqaalaha Degmada loo qorayo ama la ruqseeynayo si waafaqsan xeerka shaqaalaha Dawladaha Hoose.

## Qodobka 19aad
## Xoghayaha Dawladda Hoose

1. Dawladda Hoose waxay yeelanaysaa xoghaye fulineed oo aqoon iyo waayo arragnimo u leh hawlaha dawladaha hoose.
2. Habka xulashada xoghayaha dawladda hoose waxaa lagu faahfaahinayaa sharciyada dawladaha hoose ee heer Dawlad-goboleed.

## Qodobka 20aad
## Shaqaalaha Dawladaha Hoose

1. Shaqaalaha dawladaha hoose waa hawl-wadeennada fulinaya hawl-maalmeedka iyo qorshaha dawladaha hoose kadib marka uu ansixiyo golaha deegaanka.
2. Shaqaalaha dawladaha hoose waa kuwo joogto ah oo ku imaanaya habraacyada lagu keeno shaqaalaha rayidka ah ee JFS xuquuqdoodana leh.

## Qodobka 21aad
## Kormeerka iyo Baarista Miisaanniyadda Dawladaha Hoose

1. Haddii ay Xukuumadda Federaalka ahi ay kabto miisaanniyaddaha Dawlad-goboleedyada iyo Dawladaha hoose waxay xaq u yeelanaysaa in ay kormeerto, hubisana in loo isticmaalay ujeedka loogu talagalay.

2. Kormeerka iyo hubinta ku xusan Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa mas'uul ka ah Hanti-dhawrka guud ee Xukuumadda Federaalka ah isagoo gacan ka helaya Hanti-dhawrka Dawlad-goboleedka.

## Qodoka 22aad
## Hantida Dawladaha Hoose

1. Hantida Dawladaha Hoose waa hanti Qaran, waxaana loo isticmaali karaa oo keliya ujeeddo Qaran.
2. Waxaa reeban u isticmaalka hantida dawladda hoose ujeeddo shakhsiyadeed, ciqaabteedana waxaa loo raacayaa si waafaqsan xeerarka ciqaabta dalka.

## Qodobka 23aad
## Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose

1. Miisaaniyadda ku-tala-galka ah ee Dawladaha Hoose waa qeyb ka mid ah Miisaaniyadda Dawlad-goboleedka.
2. Sannad kasta maamulka Dawladda Hoose wuxuu diyaarinayaa ku tala-galka miisaaniyadda sannadka soo socda.
3. Ku-tala-galka Miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa la horgeynayaa Golaha Deegaanka oo leh awoodda Ansixinta, diidmada iyo wax ka beddelkaba.

## Qodobka 24aad
## Dakhliga Dawlada Hoose

Dakhliga Maamullada Dawladaha Hoose Wuxuu ka koobanyahay:

1. Canshuuraha, dakhliyada adeegga iyo kuwa xuquuqeed;
2. Macaashka ka soo xarooda hantida guurtada ah iyo mida ma-guurtada ah ee Dawladda hoose;
3. Lacagta ka soo xaroota Milkiyadda hantida guurtada ah iyo mida ma-guurtada ah ee Dawladda Hoose; iyo
4. Lacagta ka soo xaroota dakhliyada kale ee sharcigu tilmaamayo.

## Qodobka 25aad
## Habka Canshuur Saaridda

1. Si loo mideeyo tariifooyinka canshuuraha, Degmooyinka iyo Dawlad-goboleedyada Dalka waxaa loo dejinayaa xeer gaar ah oo mideeya.
2. Golaha Deegaanka marka uu go'aansado in uu hirgeliyo nidaam-canshuureed waa in ay ogeysiiyaan Wasaarada Maaliyadda ee Dawlad-goboleedka si ay u diiwaan-geliso talana uga bixiso.

## Qodobka 26aad
## Ururinta Dakhliga

1. Dakhliga Dawladda Hoose waxaa lagu ururinayaa habraac waafaqsan nidaamka maaliyadda ee dalka.
2. Lacag kasta oo la qabto waa in lagu bixiyaa rasiid (xaashida lacag qabashada loogu talagalay) lagana ansixiyey Goleyaasha Deegaanka ee heer Degmo lagana diiwaan geliyey Wasaarada Maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud ee Dawlad-goboleedka.
3. Dakhliga waxaa lagu soo xeraynayaa habraaca soo-socda:
   b) Waa in uu kushubaa canshuur-bixiyuhu koontada (Account) Dawladda Hoose si toos ah;
   t) Waa in uu ku bixiyaa (Jeeg) lagu qorayo oo keliya magaca Dawladda hoose;
   j) Hadii habraacyada (b, t) ku xusan suurtoobi waayaan waxa lagu qaban karaa Rasiid.
4. Dhamaan dakhliga la ururiyey waa in isla markaaba lagu shubaa khasnadda Dawladda Hoose ee ka furan bankiga.
5. Haddii dakhliga la ururiyey lagu shubi waayo koontada ama khasnada Dawladda Hoose isla maalintaas, waa ka-gaabis waajib, waxaana sharciga lala tiigsanayaa cidda mas'uulka ka ah.

## Qodobka 27aad
## Kharashka

1. Dawladaha hoose waxay bixin karaan kharashka loogu ogolaaday miisaaniyadda oo noqon kara sida soo socota:
   b) Kharashka loogu tala-galay socodsiinta hawl-maalmeedka caadiga ah;
   t) Kharashka hirgelinta mashaariicda horumarinta bulshada deegaanka; iyo
   j) Kharash ah deeq ay kaalmo u bixiyeen.
2. Kharash kasta oo la bixinayo waa in lagu bixiyaa xaashida lacag bixinta ayna ku lifaaqan yihiin dhammaan cadaymaha Kharash bixinta, waana in ay saxiixaan dadka sharcigu awoodda u siinayo iyo dhinaca lacagta qaadanaya si waafaqsan Shuruucda Maareynta Maaliyadda.
3. Marka laga reebo Faqradaha 1aad iyo 2aad ee Qodobkan, lama bixin karo kharash haddii uusan horey ugu jirin Miisaaniyadda.
4. Haddii ay timaaddo xaalad deg deg ah loona baahdo kharash dheeri ah, waa in si deg deg ah loo fariisiyo Golaha Deegaanka si ay u ansixiyaan kharashka dheeriga ah iyo baahida keentay iyo meesha laga keenayo kharashkaasi.

## Qodobka 28aad
## Habka Xisaabaadka

Dawladaha Hoose waa in ay ku dhaqmaan hab-xisaabeed ay sameyteen oo waafaqsan sharciga iyo nidaamka u dagsan maamulka ay hoos yimaadaan.

## Qodobka 29aad
## Mas'uuliyad Xisaabeed

1. Marka laga reebo masuuliyadda ciqaabeed ee ka imaan karta, qof kasta oo bixiya ama amra in la bixiyo kharash aan sharciga waafaqsaneyn ama feejignaan la'aan darteed sabab u noqda maqnaansho hanti dawladda hoose leedahay, waxaa khasab ku ah in uu soo celiyo hantida la bixiyey ama maqan.
2. Masuuliyadda soo-celinta hantida ku xusan faqrada kowaad ee qodobkan waxay ku dhaceysaa qofka bixiyey haddii uusan amar qoraal ah ka haysan Golaha Deegaanka ama madaxda ka sarraysa oo awoodda u leh.
3. Amarka qoraalka ah ee ku xusan Faqradaha 1aad iyo 2aad ee Qodobkan waa inuu noqdaa mid lagu go'aamiyay konton boqolkiiba lagu daray hal (50%+1) ee tirada guud ee Xubnaha Golaha Deegaanka islamarkaana lagu muujiyaa magacyada xubnaha oggolaaday bixinta hantida Dawlada Hoose hadal qoraalka Golaha Deegaanka.
4. Xaaladaha aan ku xusneyn sharcigan dawladaha hoose waxay ku dhaqmayaan sharciga iyo xeer hoosaadka Dawlad Goboleedka ay degmadu hoos tagto.

## Qodobka 30aad
## Gunnooyinka iyo Mushaaraadka Madaxda iyo Shaqaalaha Dawladaha Hoose

Gunnooyinka iyo mushaarooyinka madaxda iyo shaqaalaha degmooyinka waxaa lagu qeexayaaa Sharci Dawalaha Hoose ee heer Dawlad-goboleed ah.

## Qodobka 31aad
## Bannaanaanshaha Xilka Xubinnimada Goleyaasha Deegaanka

Haddii uu bannaanaado jagada xubin ka mid ah Xubnaha Golaha Deegaanka, waxaa lagu buuxinayaa isla habraacii ay ku timid xubinta xilka bannaysay.

## Qodobka 32aad
## Xalinta Khilaafaadka Maamullada Degmooyinka

Haddii uu khilaaf soo kala dhex-galo Xubnaha Golaha deegaanka waxaa u xilsaaran xalintiisa Wasaarada Arrimaha Gudaha ee Maamul-goboleedka si waafaqsan shuruucda heer Dawlad-goboleed.

## Qodobka 33aad
## Fara-gelinta Dawladda Federaalka ee Xallinta khilaafaadka Maamullada Degmooyinka iyo Dawlad-goboleedyada

Dawladda Federaalka waxay dhex-geli kartaa maamulada Degmooyinka iyo Dawlad-gobaleedyada haddii:

1. Dawlad-goboleedku xallin waayo khilaafka Maamulka heer Degmo, waxay Dawlada Federalka ka codsan karaan in ay gacan ka siiso xalinta khilaafka.
2. Dawlad-goboleedyada khilaaf soo dhex-galo waxay Dawlada Federalka ka codsan karaan in ay gacan ka siiso xalinta khilaafka.
3. Haddii ay dhacdo masiibo dabiici ah, Dawladda Federaalka waxay si rasmi ah ugu dhawaaqeysaa in ay dhacday masiibo qaran, waxayna la wareegeysaa masu'uuliyadda maareynta masiibadaas iyadoo la kaashaneysa maamulada Deegaankaas.

## Qodobka 34aad
## Baabi'in

1. Dhamaan wixii shuruuc ah ee kasoo horjeeda sharcigan waa la baabi'iyay.
2. Wixii sharcigan laga waayo waxaa dhammeystiraya shuruucda Dawlad-goboleedyada ee nidaaminaysa Arrimaha Dawladaha Hoose.

## Qodobka 35aad
## Dib-u-eegis

Sharcigan waxaa dib loo eegayaa Shan sanadood kaddib taariikhda la ansixiyey si loo qiimeeyo saameynta uu ku yeeshay horumarinta dawladaha hoose, waxaa kale oo dib loo eegikaraa mar kasta oo ay timaado baahi loo qabo .

## Qodobka 36aad
## Dhaqan-gal

Sharcigaan waxaa uu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Federaalka.